



Tar. 08/09/2016

War-Saxaafadeed

Warsaxaafadeed ay PUNSAA ka soo saartay kulamadii ay la yeelatay Maamulada ka jira Waqooyiga iyo Koonfurta Mudug, Magaalada Gaalkacayo iyo Madaxda Dawlad Goboleedyada Puntland iyo Galmudug.

Xubno ka tirsan bulshada Rayidka ah ee Puntland iyo Jaamacadda GU ee Koonfurta Magaalada Gaalkacayo oo 31 August – 1 September 2016 magaalada Cadaado kaga qaybgalay kulan wada tashi oo ay halkaas ku yeesheen Bulshada Rayidka ee Soomaaliya ayaa waxa u suurta gashay in ay kulamo nabadeed la yeesheen qaar ka mid ah masuuliyiinta iyo bulshada rayidka ah ee Galmudug iyo Puntland.

Xubnahaas oo markii ay ku sii socdeen magaalda Cadaado dhulka sii maray markii dambena dhulka soo maray waxa ay 3rd Sept. 2016 Magaalada Gaalkacayo qaybta Koonfureed kula kulmeen Madaxda Dawladda Galmudug oo ay ka mid ahaayeen madaxweyne ku xigeenka, qaar ka mid ah golaha wasiirada, barlamaanka iyo madaxda Gobolka Mudug dhinaca koonfureed iyo Degmada Gaalkacayo qaybta koonfureed iyo madax kale. Waxa kale oo halkaas ay kula kulmeen Hogaanka dhaqanka, nabad doonada, ganacsatada, culimada iyo masuuliyiin kale oo ka tirsan bulshada Rayidka ah.

Waxa ay sidaas oo kale ay xubnahaas 4 September 2016 ay dhinca waqooyi ee Magaalada Gaalkacayo kula kulmeen Madaxda Dawlada Puntland oo ay ka mid ahaayeen Madaxweynaha, Madaxweyne ku xigeenka, xubno ka tirsan golaha wasiirada iyo golaha barlamaanka, madaxda Gobolka Mudug dhinaca Waqooyi iyo Degmada Gaalkacayo dhinaca Waqooyi iyo madax kale. waxa ay sidaas oo kale la kulmeen Hoggaanka dhaqanka, nabad doonada, ganacsatada iyo culimada iyo masuuliyiin kale oo ka tirsan bulshada rayidka ah.

Waxa ay labada dhinacba kala kulmeen soo dhoweyn aad u diiran iyagoo ku boorinayey in nabadda laga wada shaqeeyo, colaadda la joojiyo, loona hawl galo sidii nabad waarta ay u helilahaayeen dadweynaha ku dhaqan Magaalada Gaalkacayo iyo guud ahaan Gobolka Mudug. Islamarkaasna ay wada shaqayn buuxda u yeelan lahaayeen madaxda labada dhinac oo Puntland iyo Galmudug si ay bulshadu u hesho nabad-ku-wada noolaansho, is-aaminaad iyo horumar.

Waxa xubnahaas ka kooban bulshada Rayidka ah ee Puntland iyo Jaamacadda GU u muuqatay in xal loo helikaro dhibaatooyinka iyo colaadaha joogtada ah ee mudadda dheer ka taagnaa Magaalada Gaalkaxayo iyo guud ahaan Gobolka Mudug, oo socdaalkan gaabani u noqon karo meel laga amba qaado. Waxa caddaan ah in labada dhinacba ay doonaayaan nabadayn iyo isu-soo—dhowaansho in ay dhexmarto, laakiin ay u baahan tahay farsamo wanaagsan.

Waxa xubnahaas u suurta gashay in ay 5th September 2016 Gegada Dayuuradaha ee magaalada Gaalkacayo ku kulmiyaan Guddiga Abniga ee labada dhinca oo ay ka mid ahaayeen labada Guddoomiye gobol iyo ku xigeenadooda, labada duq magaalo iyo ku xigeenadooda, iyo labada taliye boolis. Halkaas oo la isku afgaratay in si wada jir ah looga shaqeeyo ilaalinta nabadda islamarkaasna la degsado qorshihii lagu wada shaqayn lahaa.

Ugu damayntii waxa ay xubnahaasi isku waafaqeen in loo guntado ciribtirka colaadda ka taagan gobolka Mudug gaar ahaan magaalada Gaalkacayo, iyadoo maanka lagu hayo:

1. In loo baahanyahay qorshe tifaftiran, abaabul, diyaargaraw, dhaqaale iyo waqti loo huro.
2. In khilaafaadku yahay mud gun dheer oo u baahan in marka hore deraasad lagu sameeyo oo la lafaguro waxyaabaha khilaafaadka dhaliya iyo sababaha keena.
3. In loo saaro dad isku dhaf ah oo leh daacadnimo, kalsooni iyo magac bulshada dhexdeeda oo u madax banaan haswshaas.
4. In waxyaabaha la isku khilaafsan yahay loo kala guro sida ay uu kala fudud yihiinna loona daaweeyo.
5. In la joojiyo ereyada coleytanka leh ee laysku weydaarsado saxaafadda.
6. In madaxda labada dhinac ay abuuraan jawi ay kaga wada shaqeeyaan ammaanka iyo soo celinta is-aaminaadda dadka.
7. In meesha laga saaro tuhunka iyo hubaal la'aanta uu dhinacba-dhinaca kale u hayo ama ku eedeynayo.
8. In Hoggoonka dhaqanka, Culimada, Ganacsatada, Dhalinyarada, Haweenka, booliska iyo Maamulada ka dhisan Gobolku kawada shaqeeyaan sugidda amniga iyo suurta gelinta isdhexgalka dadweynaha, oo ay iska qabtaan shakhsiyaadka ka shaqeeya hurinta colaadda, diradirada iyo isu-bahala gelinta ummadda.

Ugu damaynti waxa ay xubnaha ka soo jeediyey dhinaca Puntland ee bulshada Rayhidka ah ee PUNSAA ay aad uga mahad celinayaan dadweynaha iyo dawladda reer Galmudug sidii wanaagsanayd ee walaaltinimada lahayd ee loola dhaqmay muddadii ay ku sugnaayeen Xaafadda Koofureed ee magaalada Gaalkacayo iyo magaalada Cadaado, waxayna boorinayaan in si dhaqso ah loo galo wax-ka qabashada colaadda ka taagan Mudug.

Guddoomiyaha Dallada (PUNSAA)

Nuur Shire Cismaan

